



Xog Ku Saabsan Caafimaadka Dadweynaha oo ku socota Qoysaska PPS

Gacaliye Qoysaska PPS,

Waxa suurtagal ah in aad dhawaan aragtay wararka warbaahintu ka bixineyso xanuunka coronavirus 2019-nCoV kaasi oo ku fiday gudaha iyo meelo ka baxsan wadanka Shiinaha. Waxaan jecelnahay in aan idinla wadaagno xog ku saabsan xanuunkani, oo ay nala wadaageen qeybta Caafimaadka Dadweynaha Degmada Multnomah. Waxaad xogtan ka heli kartaa marka aad gujiso fariinta xagga hoose ee ku lifaaqan.

Degmada Multnomah ma aaminsan in cid ka mid ah Iskuulada PPS, ardayda ama shaqaalaha ay khatar ku jirto waqtigan aan ku jirno. Xaqiiqdii, ma jiro bukaan la xaqiijiyey oo qaba xanuunka coronavirus Gobolkani Oregon. Dugsiyada Degmadu waxa ay raaci doontaa soo jeedinta caafimaadka dadweynaha iyada oo aan hakinay barnaamijka ardayda la isku bedeli jiray iyo waliba safaradii wadanka dibadiisa loo bixi jiray hadda ee dhinaca wadanka Shiinaha.

Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxa ay si dhow ula socon doonaa xaaladani. Waxaa si taxadir leh ula socda koox shaqaalaha ah oo dib u eegis ku sameynaya oo ay ka mid yihiin shaqaalaha Xafiiska Waxqabadka Iskuulada, Barnaamihka Waxbarashada Labada Luqadood, Waaxda Isgaarsiinta, Maamulka Hawlaha Degdega ah, Waaxda Hawlaha Khatarta ah, Waaxda Caafimaadka iyo Guusha Ardayda, Waaxda Nabadgelyada iyo Caafimaadka Deegaanka, iyo Waaxda Hawlgalada Dhismayaasha Dugsiyada.

Nabadgelyada iyo caafimaadka ardayda iyo shaqaalahayga waxaan siineynaa mudnaanta koowaad. Haddii aad hayso wax su'aalo ah ama aad wax tabaneyso, fadlan waxaad booqataa shabakadani [Multnomah County Health Dept website](#). Sidoo kale waxaad wici kartaa saacadaha shaqada xafiiska Addeega Cudurada Dadweynaha ee Faafa (Communicable Disease Services) ee telefoonkiisu yahay 503-988-3406, ama waxaad email u dirtaa pubinfo@pps.net.

Waad mahadsan tihiin.

[January 31, 2020 Letter from MESD & Multnomah County Health Department](#)

[Multnomah County Health Department Coronavirus FAQ](#)